

# HABKA LOO SOO GUDBIYO BEDELAADA ARDAYDA 2026-27

## MIYAAD OGTAHAY?

- Bedelka dugsiyada sanadka badhtamihiisa waxaa lala xiriiriyey inay waxbarashada ardayga ka lunto iyo haddii ay suurtagal tahay in laga hortago bedelkaasi.
- Inta badan dugsiyada PPS iyo barnaamijyadoodu waxay leeyihiin **Tiro xadidan ama boos uguma bannaana** ardayda cusub ee bedel doonka ah, gaar ahaan dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sarre.

**SABABAHAASI DARTOOD, CODSIGA BEDELADA BADHTAMAHA SANADKA WAA INUU KA BILAABMAA LA TASHIGA IYO SOO GUDBINTA ARDAYGA EE DUGSIGA HADDA UU WAX KA BARTO EE DUGSIYADA PPS.**

## SHURUUDAHAN SOO SOCDA WAXAY U QALMAAN IN MUDNAANTA LA SHIYO BEDELKA:

- Ardayda codsanaya inay iska bedelaan dugsi ay hadda wax ka bartaan ka dibna ay iska diiwaangalinaya dugsi ku yaala dariskooda.
  - Ogow: Codsiga bedelka looma baahan haddii ardaygu iska diiwaangalinayo dugsi dariskooda ka dib marka uu wax ka barnayey dugsiyada jaartarta ah ama dugsiyada badiilka ah
- Ardayda mid ama ka badan oo walaaladdii ay hadda wax ka bartaan dugsi ay codsaday
- Barnaamijyada Waxbarashada Lagu Barto Labada Luqadood (DLI), ardayda ku hadla luqada uu barnaamijka diirada saarayo ee ay guriga kaga hadlaan iyaga oo aan hadda ka diiwaangashaneyn barnaamijka DLI ee Dugsiyada Dadweynaha Portland
- Ardayda ay haysato dhibaata deganaanshaha la'aanta hoyga ama ay soo gudbisay DHS-tu
- Kuwa kale ee la xaqiijiyey inay haysato dhibaato la ogyahay

## SIDA LOO CODSADO BEDELKA BADHTAMAHA SANADKA:

- La xiriir la-taliyaha dugsi aad hadda wax ka barato ama maamulka haddii aad aaminsan tahay in ilmahaagu uu waajahayo **dhibaato daran oo saameyneyso caafimaadkooda, nabadgelyadooda ama horumarka waxbarashada.**
- Waxay ka hadli doonaan welwelkaaga iyada oo ay kaala shaqeyn doonaan sidii loo aqoonsan lahaa in xaaladda wax laga qabto.
- Haddii aad wali xiisayneyso inaad iska bedesho dugsi, shaqaalaha dugsi aad hadda wax ka barato ayaa waxay soo gudbin doonaan codsigaaga iyaga oo adiga kaa wakiil ah.
- Inta badan codsiyadu waxay Xarunta Dhexe ee Isdiiwaangalinta iyo Bedelka ka heli doonaan natijada codsigooda hal ilaa labo todobaad gudahooda.
- Xitaa ardayda u qalanta bedelka waxaa suurtagal ah inaan la ansixin haddii ay jirto boos la'aani dugsiyada ay codsadeen in loo bedelo. Ikhtiyaaraadka dugsiyada dhexe iyo sare ee badiilka ah waxaa suurtagal ah in laga helo boos iyada la marayo Addeegyada Dib Ugu Soo Celinta Dugsiyada (Reconnection Services).
- *Haddii ardaygaagu hadda uunsan ka diiwaangashaneyn dugsiyada PPS fadlan waxaad la xiriirtaa Xafiiska Isdiiwaangalinta iyo Bedelka si aad ballan uga qabsato shaqaale ku takhasusay meeleynta ardayda adiga oo la-tashi kala sameyneyso meesha lagu meelaynayo ardaygaaga.*

## BEDELAADA SANAD-DUGSIYEEDKA DUGSIYADA 2027-28

Macluumaadku wuxuu diyaar noqon doonaa kadib marka Guddiyadu u codeeyaan hannaanka dib-u-hagaajinta baaxada cabbirka dugsiyada bisha Diseembar 2026. Wixii faahfaahin ah, booqo [pps.net/rightsizing](https://pps.net/rightsizing). Macluumaadka ku saabsan bedelaada waxaa lagu soo gudbin doonaa [pps.net/schoolchoice](https://pps.net/schoolchoice) marka uu diyaar noqdo.

Gudbino loogama baahna bedelaadaha sannad dugsiyeedka soo socda, waxaa keliya looga baahan yahay codsiyada degdegga ah ee sannadka dugsiyeedka hadda socda.



(503) 916-3205



[enrollment-office@pps.net](mailto:enrollment-office@pps.net)